

Dhageysiga dacwadii Madaxweyne C/laahi Yuusuf ay ku soo ogeen qoyskii Suldaan Hurre oo ka billaabatay London

London

Maxkamadda baareysa dilkii Suldaan Axmed Max'uud Hurre oo lagu dilay tuulada Kala-beydh ee gobolka Nugaal taariikhdu markey ahayd 17-kii Ogoosto 2002-dii ayaa dib uga furantay magaalada London ee dalka Ingiriiska, waxeyna qoraal ay maxkamadu soo saartay ay ku sheegtay in 14-ka bisan oo ku beegneyd maalinimadii shalay in si rasmi ah loo furay dhageysiga dacwada Suldaan Hurre, waxaana ku eedeysan dilkaasi sida ay maxkamadu sheegtay C/laahi Yuusuf Axmed oo ah madaxweynaha Soomaaliya.

Qoraal ay maxkamadu soo saartay 9-kii bishan la soo dhaafay ee Febraayo ayaa lagula socodsiiyey labada dhinac in maxkamadu dhaceyso 14-ka Maarso 2005-ta, iyadoo qoyska ALLAHA u naxariistee Suldaanka ay horay ugu guuleysteen in ay dacwad ay hordhigeen maxkamadda Civil-ka ay u gudbiso maxkamadda Criminal case-ka.

Ehelada Suldaan Hurre ayaa horay u sheegay in dilka Suldaanka ay geysteen ilaaladii qaaska ahayd ee C/laahi Yuusuf xilligii uu ahaa madaxweynaha Puntland uuna isagu amray in la dilo, , waxeyna sheegeen ehelada Suldaanka in horay lagaga dalbaday in ay ka waantoobaan dacwadan ayna qaateen magdhow intii ay doonaan ah taasoo ay sheegeen in ay diideen kuna adkeysteen in ay sii wadi doonaan maxkamadan inta ay ka kala cadaaneyso gacantii dishay suldaanka.

C/laahi Yuusuf ayaa isagu iska fogeeyey in uu amray shirqoolka dilka Suldaanka, balse wuxuu sheegay in ay dileen ilaaladiisa mar ay isku dayeen in ay qabtaan.

Cabdishakuur Cilmi Xasan ,Dayniile Muqdisho

cabdishakuur@dayniile.com

webmaster@dayniile.com